

## Qorshaha Korineed ee Hadalka, Luuqada iyo Maqalka:

### Dhalashada ilaa Da'da 3 Bilood Jirka

- Libiqsi ama boodid marka uu dhawaq kadiso ah, oo dheer baxo
- Aamusid ama dhoolacadayn marka lala hadlo
- Samayn codadka sida "ohh" iyo "ahh"

### Da'da 4 ilaa 6 Bilood Jirka

- Indhaha laraaca codka
- Hadaaqa dhawaqyo badan

Samayn codad kala duwan marka la xanaaqsan tahay ama faraxsan yahay

### Da'da 7 Bilood ilaa 1 Sano Jirka

- Madax u jeedin dhawaqa
- Fahmid "no-no" ama "bye-bye"
- Hadaaqid, tusaale ahaan "baba," "mama," "gaga"
- Ku celid kalmado iyo codadka aad samayso
- Ku hadaaqa saxda ah ee "mama" ama "dada"



Haddii aad wax su'aal ah ka qabtid maqalka ilmahaaga ama waxyaabahan, kala sheekeyso dhakhtarka ilmahaaga.

Nebraska Early Hearing



Detection & Intervention Program

La hadal 402-471-6770 ama khadka tooska ah : 1-888-545-0935

Rev 03/2015

## Yaa ku kaalmayn kara haddii ilmuhu daryeel gaar ah u baahan yahay?

Early Development Network in Nebraska.

Kala xidhiidh lambarka khadkooda tooska ah 1-888-806-6287.



### Halkeen ka heli karaa xog dheeraad ah?

[www.babyhearing.org](http://www.babyhearing.org)

### Natiijada baaritaankailmahaaga ee dhanka maqalka

#### Magaca Ilmahaaga

#### Taariikhda iyo Wakhtiga

#### Xarunta Dhalmadaa Magaca Baarahaaga

##### Natiijada

GUBBAY  TIXRAAC

##### Dhagta Midig

GUBBAY  TIXRAAC

##### Dhagta bidix

Haddii ilmahaaga loo gudbiyo baaritaan kale oo maqal ah, waa in aad sugtaa in uu ilmuhu maro baaritaanka kale sida ugu dhakhsaha badan.



U.S. Department of Health and Human Services  
**HRSA**  
Health Resources and Services Administration

Mashruucan waxaa taakuleeya Health Resources and Services Administration (HRSA) ee Department of Health and Human Services (HHS) oo hoos timaada lambarka adduunka H61MC00065, Universal Newborn Hearing Screening, taas oo isugayn ah \$249,678. Majirto wax urur aan dawli ahayn oo taakuleeya barnaamijkan. Xogtan ama macluumaadkan iyo qoraalkani waa ka qoraaga waana in aan loo arag mid sharci ama weedha rasmi ah, sidoo kale maaha mid lagu daba galayo HRSA, HHS ama Dawlada U.S.

# Ilmahaagu Wax Ma Maqlayaa?



## BAARITAANKA KOWAAD EE ILMAHAAGA

**NEBRASKA**

Good Life. Great Mission.

DEPT. OF HEALTH AND HUMAN SERVICES

Somali

## Waa maxay sababta loo baaritaano maqalka ilmahayga?



- ◆ Badi caruurta markay dhashaan waxbay maqlaan laakiin tiro yar ayaan maqal.
- ◆ Dhammaan caruurta waa la baraa si loo hubiyo. Baaritaanka sabigu qaa qaab kamid ah qaababka lagu ogaan karo.
- ◆ Waxaa muhiim ah in wakhti hore la ogaado haddii uu ilmahaagu u baahan yahay daryeel gaar ah iyo kahortag mudo hore ah.

**Waa in aad sugtaa in ilmahaaga la baaritaano kahor intaanad isbitaalka ka bixin.**

## Maxay tahay inaan ka ogaado baaritaanka maqalka ee sabiga?

- ◆ Baaritaanku waa badbaado, xanuun malaha waxaana lagu soo gunaanadaa 10 daqiiqo.
- ◆ Badi caruurta way iska hurdaan inta uu baaritaan socdo.
- ◆ Waa in aad jawaabta qaadataa kahor intaanad ka tagin isbitaalka.
- ◆ Waa in aad isbitaalka u sheegtaa magaca dhakhtarka ilmahaaga si duwaanka caafimaadka ilmaha loo galiyo.



## Waa maxay sababta caruurta qaar loogu gudbiyo baaritaan dheeraad ah?

Caruurta qaar waxay ugu baahan yihiin baaritaan maqalka oo kale sababta oo ah:

- ◇ Dareere dhagaha ku jira
  - ◇ Cod ka jiray qolka baaritaanka
  - ◇ Ilmuhu wuu dhaqdhaqaaqayay intii baaritaanku socday
  - ◇ Ilmuhu si fiican waxba uma maqlayo
- ◆ Badi caruurta u baahan baaritaan kale si caadi ah ayay wax u maqlaan. Balse, qaar ayaa u baahan baaritaan daba gal oo gaar ah.

**Haddii ilmahaaga loo gudbiyo baaritaan kale oo maqal ah, waa in aad sugtaa in uu ilmuhu maro baaritaankaa kale sida ugu dhakhsaha badan.**

**Ilmaha sabiga ah inta uu ka dugbo baaritaanka maqalka ah hadana wali masii ahaan karaa mid aan waxba maqal?**

Haa, caruurta qaar si fiican ayay wax u maqlaan kaas oo ay baaritaanka kaga gudbaan, balse waxa ay maqalka waayaan mudo danbe sababta oo ah:

- ◇ Xanuunada qaar
  - ◇ Dawooyinka qaar
  - ◇ Dhaawacyada qaar
- Dhago la'aan hido raac qoys ah
- ◆ U fiirso calaamadaha dhago la'aanta inta uu ilmuhu korayo. Liiska dhabarka ku qoran tilmaamo ahaan u isticmaal oo adeegso.

## Sidee loo baaritaanayaa maqalka ilmahayga?

Maqalka ilmaha waxaa la baaritaanayaa 24 saacadood ee cimrigiisa ugu horeysa. Waxaa jira laba nooc oo baaritaan maqalka ah: Auditory Brainstem Response (ABR) iyo Otoacoustic Emission (OAE). Labada baaritaanka mudo daqiiqado ah ayaa lagu dhameeyaa, badi caruurtuna way hurdaa inta uu socda.



Baaritaanka ABR waxa uu adeegsadaa sameecado yaryar iyo qalab kale oo band-aid oo kale ah oo elektoronig ah kaas oo dhagaha lagu rakibo si

dhaqaaqa maskaxda loola socdo. Baaritaankani waxa uu eegaa jawaab celinta maskaxda ee codka.

**Baaritaanka OAE waxa uu**

adeegsadaa duugid yar oo dhagaha ah iyo sameecado yar-



yar si "jabaqda" loo qiyaaso kasoo noqonaysa godka dhagta markay jawaab celinta codka ku samaynaysa.